



**XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAAN-GELINTA MURASHAXIINTA EE URURRADA
/XISBIYADA SIYAASADDA**

QAYBTA 1AAD: Iyada oo La Raacayo Qodobka 35aad: Ururrada/Xisbiyada Siyaasadda ee ka Qayb-gelaya Doorashooyinka

1. Murashaxiinta ay soo xuleen Ururrada/xisbiyadda ayaa uga qeyb-galaya doorashooyinka kuraasta loo tartamayo, taasoo macnaheedu yahay in:

- i. Xubnaha ururrada ama xisbiyada siyaasadeed oo ay soo doortaan shaqsiyaad u tartami doona ama ka qayb-gali doona doorashada kuraasta: -
 - a. Golayaasha deegaanka ee degmooyinka Dalka
 - **Nooca Doorasho:** Nidaamka Matelaadda Isu-dheellitiran ee Liiska Xiran (Proportional Representation-Close List)
 - b. Muqdisho iyo Degmooyinka Gobolka Banaadir
 - **Nooca Doorasho:** Nidaamka Matelaadda Isu-dheellitiran ee Lliiska Xiran (Proportional Representation-Close List)
 - c. Duqa Caaasimadda Muqdisho iyo ku-xigeennada, Duqa magaalada iyo ku-xigeenka ee degmo kasta
 - Habka soo gudbinta: Urur/xisbi kasta waa inuu soo gudbiyaa musharixiintan iyagoo isku sidkan (hal musharax ah) oo wada guulaysta ama wada dhaca
- ii. Golayaasha Wakiillada, Hoggaamiye iyo Ku-xigeen ee Dowlad- Gobleedyada,
- iii. Madxweynaha JFS.
- iv. Baarlamaanka Federaalka

2. Xulashada Murashaxiinta:

- i. Ururradu ama xisbiyaddu waa in ay soo xulaan murashaxiinta iyagoo raacayo xeerarka doorashooyinka iyo siyaasadaha ururka ee ku saleysan saami-qaybsiga loo dhan-yahay ee Bulshada , iyadoo aan lagu koobin qabiil ama koox gaar ah. ii. Ururradu ama xisbiyadu waxay hubinayaan in beelaha, gobollada, iyo qeybaha kale ee Bulshada ay helaan fursad siman oo ay uga qayb galaan doorashada.
- ii. Xulashada murashaxiinta waa in ay ku saleysan tahay aqoon, khibrad, iyo karti si loo hubiyo in murashaxu uu leeyahay awood uu ku matalo danaha Bulshada uu matalaayo.



3. Soo Xulista Musharixiinta ee Urrurka/Xisbiga

Urur/xisbiyadu waxay leeyihiin nidaamyo ay ku xushaan musharixiintooda, waxaana ka mid ah:

- i. **Xubinimo Urur/xisbiga** – Waa inuu musharaxu yahay xubin rasmi ah oo xisbiga ka mid ahaa muddo cayiman.
- ii. **Taageero Gudaha Urur/Xisbiga** – Waa inuu musharaxu helo taageero ka timaadda madaxda Urur/xisbiga ama xubnaha kala duwan ee xisbiga/ururka ka midka ah.
- iii. **Doorasho Gudaha Urur/xisbiga** – Urur/xisbiyada qaar waxay qabtaan doorashooyin hordhac ah (Primary elections) si loogu doorto musharixiintooda ku tartami doona Dallada Ururka/Xisbiga.
- iv. **Kartida & Khibradda** – Urur/xisbiyada qaar waxay qiimeeyaan musharixiinta iyaga oo loo eegaayo khibraddooda siyaasadeed, aqoontooda, ama hoggaanmitooda bulshada.

4. Saami-Qaybsiga:

- i. Xulashada murashaxiinta waa in ay la jaan-qaaddo saami-qaybsiga ku xusan Xeerarka Doorashooyinka Qaranka iyo xeerarka ururka/xisbiga sida: -
 - a. Saami-qaybsiga beelaha,
 - b. Saami-qaybsiga Haweenka
 - c. Saami-qaybsiga gobollada.
- ii. Hanaanka xulashada Ururka ama xisbiga waa in uu tix-geliyo qodobbada sharci ee la xiriira saami-qaybsiga si loo helo ka qayb gal bulsho oo loo dhan-yahay.
- iii. Ururka ama xisbiga xulashada sameynaya waa in uu xaqiijiyaa in qaybaha kala duwan ee bulshada ee ka muuqda liiska musharixiinta ay si siman u matalaan bulshada, iyadoo la ilaalinayo sinaanta matalaadda haweenka (Gender Balance), beelaha, iyo gobollada Dalka.

5. Tix-gelinta Marxaladaha Gaarka ah:

- i. Xulashada murashaxiinta waa in aan loo eegin cida taageereysa ururka/xisbiga oo kaliya ama xaaladaha siyaasadeed ee gaarka ah ee waqtigaas, balse waa in ay xoogga saaraan in murashaxiintu ay ka tarjumi karaan danta guud ee bulshada oo dhan.
- ii. Ururka ama xisbiga xulashada sameynaya waa in uu hubiyaa in xubnaha ururka ee tartamaya ay yihiin kuwo ka tarjumaya danta guud ee bulshada, iyadoo la tix-gelinayo xuquuqda iyo fursadaha dadka oo dhan.

6. Masuuliyadda Ururka ee Hubinta Xulashda:

- i. Waa in ururadu ama xisbiyaddu ay sameeyaan guddi kormeer oo ka shaqeeya hubinta in xulashada murashaxiinta ay waafaqsan tahay xeerarka iyo siyaasadda ururka ee saamiqaybsiga bulshada Soomaaliyeed.
- ii. Gudiga kormeerku waa in uu si joogto ah u eego habka xulashada iyo qaabka loo fulinayo isu-dheelli-tirka bulshada.
- iii. Haddii ay jiraan khaladaad ka dhaca habka xulashada, waa in gudiga kormeerku ay soo jeediyaan in la sameeyo isbeddel iyo sixid/hagaajin si loo ilaaliyo sinaanta iyo cadaaladda bulshada Soomaaliyeed.

7. Fulinta Qoondada Haweenka: -

- i. Ururadu/Xisbiyadu waa inay hubiyaan in liiska murashaxiinta ee doorashooyinka uga qeybgalaya ay ku jiraan ugu yaraan boqolkiiba 30% haween ah.
- ii. Qoondadani waa in lagu daro saddexdii kursi-ba mid kamid ah haweenka kaliya in loo xiro in ay ku tartamaan.
- iii. Ururadu/Xisbiyadu waa inay hubiyaan in soo xulista haweenka loo sameeyo si cadaalad ah oo aan ku xad-gudbayn xuquuqda jinsiga.

8. Matalaadda Qaybaha Bulshada

- i. Ururadu/Xisbiyadu waa inay tix-geliyaan matalaadda qaybaha bulshada kala duwan marka ay sameynayaan liiska murashaxiinta sida.
 - a. Dadka naafada ah,
 - b. Dadka laga tirada badan yahay
 - c. Dadka lahaybsooco
 - d. Haweenka
 - e. Dhallinyarada ay helaan matalaad ku filan.
- ii. Ururadu/Xisbiyadu waa inay leeyihiin go'aanno ku saleysan kala duwanaanshaha bulshada si loo hubiyo in dhammaan qaybaha bulshadu ay helaan fursad siman.

9. Hubinta Liisaska Murashaxiinta

- i. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ayaa hubinaya



liisaska ururradu/xisbiyadu ay u soo sharraxayaan golayaasha kala duwan ee loo tartamayo in ay yihiin kuwa dheelli-tiran sida ku xusan Faqradaha 3aad, 4aad iyo 5aad ee Qodobka 35aad ee Xeerka Doorashooyinka Qaranka, iyadoo la raacayo Xeer- nidaamiyahan. ii. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu mas'uul ka noqon doonaa kormeerka doorashada hordhaca ah (Primary Elections) ee ururrada/xisbiyada iyo xaqijinta in liisaska ururrada iyo xisbiyada ay ku jiraan:

- a. Ugu yaraan 30% haween ah, iyadoo la raacayo qoondada haweenka ee ku xusan Xeerarka Doorashooyinka Qaranka.
- b. In liisasku ay ka turjumayaan kala duwanaanshaha qaybaha bulshada sida dadka naafada ah, dadka laga tirada badan yahay, kuawa lahayd-sooco, haweenka iyo dhallinyarada. iii. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ayaa qaban doona qiimeyn iyo dib-u-eegis jooqto ah oo lagu hubinayo in liisaska ururradu/xisbiyadu ay la jaan-qaadayaan xeerarka doorashooyinka ee Dalka u yaalla.

QAYBTA 2AAD:Iyada oo La Raacayo

Qodobka 36^{aad}: Murashaxiinta Doorashooyinka

1. Xaqa muwaadiniinta ee cod-bixinta iyo muusharaxnimada –

- i. Si waafaqsan Qodobka 21 (2) ee Dastuurka:
 - a. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha Xeerarka JFS ku xusan wuxuu xaq u leeyahay inuu codeeyo/wax doorto iyo in loo codeeyo/la doorto.
 - b. Qof kasta oo buuxiyay shuruudaha murashaxnimada, sida da'da, aqoonta, muwaadinnimada, iyo shuruudaha kale ee ku xusan Xeerka, wuxuu noqon karaa musharrax.
 - c. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha Xeerarka JFS ku xusan wuxuu xaq u leeyahay in loo doorto jago siyaasadeed ama xil qaran, isagoo u tartami kara doorashooyinka heer federaal, heer dowlad-goboleed, heer gobol iyo degmo.
 - d. Dastuurka ayaa dammaanad qaadaya in muwaadiniintu ay si siman ugu tartamaan doorashooyinka, iyada oo aan lagu xad-gudbin xuquuqdooda cod-bixineed ama xuquuqda lagu dooran karo, taas oo meesha ka saaraysa faquuq iyo takoorka.
 - e. Xuquuqdan Lama hor istaagi karo, waxaana lagu maamuli doonaa si waafaqsan Dastuurka Iyo Xeerarka Doorashooyinka ee Qaranka u yalla.

2. Xisbiyada/Ururrada Diiwaan-gashan:

- i. Musharrax lama diiwaangelin karo haddii aanu ka iman urur ama xisbi siyaasadeed oo si rasmi ah loo diiwaangaliyay/aqoonsaday.



3. Shuruudaha Musharraxa:

- i. Musharrax lama diiwaan-gelin karo haddii aanu buuxin shuruudaha ku xusan xeerka doorashooyinka qodobadiisa kala ah 21, 37, 38, 39, 40, iyo 41.

4. Diiwaangelin iyo Xaqiijin:

- i. Musharraxiinta ururadu/xisbiyadu soo sharraxaan waa in si rasmi ah loo diiwaan-geliyo, lagana hubiyo inay buuxiyeen shuruudaha looga baahan yahay, sida:
 - a. bixinta khidmadaha diiwaan-gelinta.
 - b. soo gudbinta dukumentiyada rasmiga ah.

5. Magacaabista Musharraxiinta:

- i. Urur ama xisbi siyaasadeed kasta waxaa ku waajib ah in uu magacaabista musharraxiintiisa u maro:
 - a. Dastuurka JFS
 - b. Dastuurkiisa iyo xeerarkiisa gudaha,
 - c. Xeerarka Qaranka ee doorashooyinka iyo ururada/xisbiyada siyaasadeed,
 - d. Xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada iyo tilmaamaha Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

Tani waxay xaqiijinaysaa in ururadu/xisbiyadu si nidaamsan musharraxiintooda u soo xushaan, iyada oo la ilaalinayo cadaaladda iyo xeerarka doorashooyinka Qaranka.

6. Xubnaha ka reebban in La Soo Sharaxo:

- i. Xubnaha hoos ku xusan looma oggola inay u tartamaan doorashada haddii aanay buuxin shuruudaha shaqo ka tegidda oo ah: -
- ii. lix bilood ka hor maalinta doorashada.
 - a. **Ciidamada Qalabka Sida** (militariga, booliska, iyo hay'adaha kale ee amniga).
 - b. **Shaqaalaha Dowladda** (kuwa heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ee xilalka haya).
 - c. **Diplomaasiyiinta** (ergada dibadda u jooga magaca Dowladda).
 - d. **Xubnaha Guddiyada Madaxabannaan** (Sida: Guddiga Doorashooyinka, iyo hay'adaha madaxa-bannaan ee Dowladda).
 - e. **Xubnaha Garsoorka** (maxkamadaha iyo hay'adaha caddaaladda).

7. Xaqiijinta Shaqo-ka-tegidda ama Is-casilaadda

- i. Shaqaalaha dawladda ee lagu xusay faqrada kore (ciidamada, diblomaasiyiinta, garsoorka, iwm.) waa in ay si rasmi ah uga tagaan shaqadooda lix bilood kahor doorashada.
- ii. Hay'addii ay ka tirsanaayeen waa in ay si cad u xaqiijiso is-casilaaddooda si looga fogaado muran sharci ah.

8. Xorriyadda Ka Qayb-galka Doorashada:

- i. Qof kasta oo buuxiya shuruudaha doorashada looma diidi karo ka qayb-galka doorashada. Haddii uuna hayn jago diidaysa musharraxnimadiisa, wuxuu xor u yahay inuu iska casilo lix (6) bilood kahor xilliga doorashada golaha si uu u tartamo.

QAYBTA 3AAD:- Iyadoo La Raacayo

Qodobka 42aad: Soo-gudbinta Liiska Murashaxiinta

1. Muddada Soo Gudbinta Liiska Murashaxiinta:

- i. Uurrada siyaasadda ama xisbiyadu waa in ay soo gudbiyaan liiska murashaxiinta ururkooda/xisbigooda uga qeyb-gelaya doorashooyinka ugu yaraan Boqol iyo labaatan maalmo (120) shaqo ah ka hor maalinta doorashada golaha loo tartamayo.

2. Xogta Musharraxa Laga Soo Gudbinayo:

Marka ururrada ama xisbiyadu soo gudbiyaan liiska murashaxiinta, waa in qoraalka socda uu si cad u muujiyo:

- i. Magaca murashaxa oo afarran (magaca koowaad, magaca labaad, magaca saddexaad, iyo magaca afraad).
- ii. Magaca hooyada oo afarran.
- iii. Xogaha la xiriira dhalashada iyo aqoonsiga murashaxa.
- iv. Warbixin cad oo muujineysa murashaxa inuu buuxiyey dhammaan shuruudaha laga rabo.

3. Soo Xulidda iyo soo gudbinta Murashaxiinta:

- i. Xisbiyada iyo ururrada siyaasadeed waxaa waajib ku ah in ay si caddaalad ah u kala saaraan murashaxiinta marka ay soo xulayaan, iyaga oo raacaya habraaca ururrada/xisbiyada siyaasadda iyagoo waafajinaya shuruudaha iyo xeerarka doorashooyinka Dalka.
- ii. Marka ururrada ama xisbiyada siyaasadeed ay u gudbinayaan Guddiga Madaxa Banaan ee



Doorashooyinka iyo Soohdimaha liiska musharraxiintooda, waa inay la socdaan caddeymo rasmi ah oo xaqiijinaya:

- a. Oggolaanshaha Musharraxa ee Hab-dhaqanka (Candidates' Code of Conduct) oo uu saxiixay
 - b. Musharrax kasta waa in uu si cad u muujiyo oggolaanshihiisa inuu tartamayo.
 - c. Waa inuu ballanqaadaa inuu ixtiraamayo xeerarka iyo anshaxa doorashada
- iii. Urur kasta ama xisbi siyaasadeed kasta, marka uu soo gudbinayo liiska musharraxiintiisa, waxaa waajib ku ah:
- a. In uu ilaaliyo qoondada haweenka, taasoo dhigeysa in ugu yaraan 30% musharraxiintu ay noqdaan haween.
 - b. In saddexdii kursiba uu mid u qoondeeyo haween si loo xaqiijiyo matalaad isudheellitiran.
 - c. In liiska musharraxiintu uu waafaqsan yahay xeerarka doorashada Qaranka iyo kuwa ururada/xisbiyada siyaasadeed.

Hubinta iyo Caddeynta musharraxu waxay meesha ka saaraysaa musharraxiin aan diyaar u ahayn tartanka ama kuwa shuruudaha xeerarka doorashooyinka aan soo buuxin karaynin.

4. Habraaca Diiwaangelinta Murashaxiinta:

Si loo fududeeyo diiwaan-gelinta murashaxiinta, waa in ururrada ama xisbiyadu raacaan habraac cad oo qeexaya:

- i. Xilliga la billaabayo lana dhammeys-tirayo diiwaan-gelinta murashaxiinta.
- ii. Habka ay murashaxiintu u gudbinayaan codsiyadooda.
- iii. Nidaamka hubinta shuruudaha murashaxiinta.
- iv. Sida loo xallinayo cabashooyinka murashaxiinta.
- v. Waajibaadka Guddiga Doorashooyinka ee urur/xisbiga ee la xiriira xaqiijinta iyo ansixinta murashaxiinta.

Habraacan wuxuu ka caawinayaa ururrada iyo xisbiyada in ay si hufan u diyaariyaan murashaxiintooda, si doorashada ay u noqoto mid caddaalad ah oo waafaqsan Xeerarka doorashada Qaranka.

5. Qoondada Haweenka ee Murashaxiinta:

- i. Urur kasta ama xisbi kasta oo soo gudbinaya liiska murashaxiinta waa in uu xaqiijiyaa in ay haweenku helaan qoondada loo qoondeeyey, taasoo ah 30% (boqolkiiba soddon). Waa in saddexdii kursi ee lagu tartamayo mid ka mid ah ay haween tahay, si loo ilaaliyo matalaadda haweenka ee doorashooyinka.

6. Murashaxiinta Madaxweynaha ee Xisbiyada Siyaasadeed:

- i. Dhammaan xisbiyada siyaasadeed waa in ay si rasmi ah u caddeeyaan murashaxiintooda u tartamaya xilka Madaxweynaha Dowladda Federaalka, iyaga oo liiska murashaxiintaas si rasmi ah ugu gudbinaya Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

Tani waxay hubinaysaa:

- a. In musharraxiinta madaxweynenimo si rasmi ah loo aqoonsado.
- b. In doorashada lagu galo si hufan oo cad.
- c. In dhammaan xisbiyada u siman yihiin marka ay soo gudbinayaan musharraxiintooda.

7. Go'aanka Ururka/Xisbiga ee Ansixinta Musharraxa

- i. Waa in ururka/xisbiga uu soo raaciyo liiska musharixiinta caddayn ama qoraal rasmi ah oo muujinaya in ururka ama xisbigu ansixiyay musharraxiinta uu u soo xushay doorashada.
- ii. Tani waxay xaqiijinaysaa in musharraxiintu yihiin kuwa ururku/xisbigu si rasmi ah u taageeray, ayna jiraan habraacyo sax ah oo la raacay.

8. Warqadda Caddeynta Bixinta Khidmadda Diiwaan-gelinta

- i. Musharrax kasta waa in uu keenaa caddeyn muujineysa inuu bixiyay khidmadda diiwaangelinta.
- ii. Lacag qabashadani waa mid lagama maarmaan u ah xaqiijinta diiwaan-gelinta musharraxiinta iyo dardar-gelinta hawlaha doorashooyinka.

9. Xallinta Khilaafaadka La Xiriira Soo Gudbinta Liiska Murashaxiinta

- i. Haddii uu khilaaf ka dhex dhasho ururka ama xisbiga la xiriira soo xulista ama soo gudbinta murashaxiinta, waxaa loo raacayaa xeerarka iyo shuruucda xisbiga ama ururka siyaasadeedka, iyadoo la waafajinayo Xeerka Doorashooyinka iyo Xeerka Ururrada/xisbiyada Siyaasadda Qaranka.
- ii. Muran ka dhashay xulista ama soo-gudbinta liiska musharraxiinta ee xisbiga ama ururka, waa in loo xalliyo si waafaqsan:
 - a. Habraaca xalinta qilaafaadka ururka/xisbiga
 - b. Dastuurka Ururka/xisbiga gudihiisa,
 - c. Xeerarka Ururada/xisbiyada Siyaasadda Qaranka.
 - d. Xeerka Doorashooyinka Qaranka

Tani waxay ka hor-tageysaa khilaafaad sababi kara dib-u-dhac doorasho.

10. Doorka GMDQS ee Xalinta Khilaafaadka

- i. Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo soohdimaha wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa xallinta murannada ka dhasha soo gudbinta musharraxiinta ee urur/xisbiyada siyaasadeed.
- ii. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu sameyn karaa qabashada cabashooyin iyo baaritaanno si loo hubiyo u hoggaansanaanta xeerarka.
- iii. Qaababka uu u isticmaalayo waxaa ka mid ah:
 - a. Wicitaan/uyeerid (subpoenas),
 - b. Dhagaysi (hearings), iyo
 - c. Kormeerid/baaritaan (inspections).
 - d. Guddigu wuxuu sidoo kale xallin karaa khilaafaadka la xiriira xeerarka.
- iv. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu soo saari karaa go'aano lagu xallinayo Khilaafka/muranka
- v. Go'aanka Guddiga haddii lagu qanci waayo waxaa la raacayaa sida ku xusan xeerarka doorashooyinka Qaranka

11. Hubinta Xeerarka iyo Shuruudaha Murashaxiinta

Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu xaqiijinayaa in ururku ama xisbigu uu u soo xushay murashaxiintiisa si waafaqsan:

- i. Dastuurka JFS
- ii. Dastuurka xisbiga ama ururka.
- iii. Xeerka Xisbiyada/Urrurrada Siyaasadda ee Qaranka.
- iv. Xeerka Doorashooyinka Qaranka.

QAYBTA 4AAD:- Iyadoo La Raraacayo

Qodobka 43aad: Hubinta iyo Kala Saarista Murashaxiinta

1. Hubinta iyo Kala Saarista Murashaxiinta ururada/xisbiyada:

- i. In xisbiyada/ururrada siyaasadeed ay si caddaalad ah u kala saaraan murashaxiinta.
- ii. In xisbiyada/ururradu hubiyaan in murashaxiintoodu ay buuxiyeen shuruudaha ku xusan xeerarka.



2. Hubinta iyo Ansixinta ee Guddiga Madaxa Banaan Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha:

- i. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ayaa xaqiijinaya in liiska musharraxiinta uu waafaqsan yahay xeerarka, ka dibna ansixinaya ama dib u soo celinaya haddii ay jiraan khaladaad u baahan saxitaan.
- ii. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha marka ay helaan liiska murashaxiinta ururradu ama xisbiyadu soo gudbiyeen, waa in ay si waafaqsan xeerarka u hubiyaan, qof qof, in murashaxiinta la soo gudbiyay ay buuxiyeen dhammaan shuruudihii looga baahnaa si ay ugu tartamaan doorashada.
- iii. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waxa uu xaqiijinayaa in:
 - a. Ururka/xisbiga uu musharraxiinta u soo xulay si waafaqsan dastuurkiisa,
 - b. Liiska musharraxiinta uu waafaqsan yahay xeerarka doorashooyinka iyo ururada/xisbiyada siyaasadeed.
- iv. Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha Liisaska murashaxiinta waa in uu si hufan u gaarsiiyo dhammaan goobaha codbixinta.
- v. Marka la xaqiijiyo shuruudaha, Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu si rasmi ah u shaacinayaa liiska murashaxiinta.
- vi. Tani waxay xaqiijinaysaa in ururadu/xisbiyadu si sharci ah musharraxiintooda u soo xushaan.

3. Ogeysiinta Haddii Shuruudaha Laga Waayo Murashax:

- i. Haddii xubno ka mid ah liiska murashaxiinta aysan buuxin shuruudaha murashaxnimo, Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waxa uu muddo lix (6) maalmood gudahood oo ka billaabnaysa marka ay helaan liiska ku ogeysiinaya xisbigii/ururkii u soo gudbiyey in uu muddo afar iyo toban (14) maalmood ah ku soo dhammays-tiro shuruudaha dhiman ama beddelkooda ku keeno murashax/murashaxiinta buuxinaya shuruudaha loo baahan yahay.

4. Shaacinta Liiska Murashaxiinta:

- i. Marka uu Guddiga Madax Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimuhu hubiyo shuruudaha murashaxiinta, isla markaana uu ku qanco in ay buuxiyeen dhammaan shuruudaha looga baahan yahay, waxa uu si rasmi ah u shaacinayaa liiska murashaxiinta ee loo soo gudbiyay.

5. Gaarsiinta Liiska Murashaxiinta goobaha codbixinta:

- I. Guddiga Madax Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimuhu iyo xafiisyada

doorashooyinka ee hoos yimaada waa in ay goob kasta oo codbixineed gaarsiiyaan nuqullada liisaska murashaxiinta doorashada ee ka sharraxan xisbiyada/ururrada siyaasadda ee tartamaya, si loo hubiyo hufnaanta doorashada loona xoojiyo wacyiga codbixiyayaasha.

QAYBTA 5AAD:- Iyadoo La Raacayo Qodobka 44aad :Astaamaha Xisbiyada/Ururrada Siyaasadda ee Tartanka Doorashooyinka

1. Aqoonsiga Ururka/Xisbiga Siyaasadeed:

- i. Sida ku xusan Qodobkan, urur kasta ama xisbi siyaasadeed kasta waa in uu yeesho sumad rasmi ah oo u noqoneysa astaan u gaar ah (distinctive mark symbol) oo lagu aqoonsado urur/xisbi.
- ii. Tani waxay muhiim u tahay xaqiijinta madax-bannaanida iyo kala-duwanaanshaha ururrada/xisbiyada siyaasadeed si looga hor-tago isku ekaanshaha aqoonsiga ee ururrada/xisbiyada dhexdooda.

2. Kala Duwanaanshaha Astaamaha:

- i. Astaamaha xisbiyada iyo ururrada siyaasadeed waa in ay si cad uga duwan yihiin midba midka kale. ii. Xisbi ama urur siyaasadeed lama oggola inuu isticmaalo astaan la mid ah ama u dhow tan urur/xisbi kale.
- iii. Qodobkan waxa uu xoojinayaa mabda'a tartanka xorta ah iyo hufnaanta doorashooyinka, si loo sugo in codbixiyayaashu si sax ah u kala gartaan xisbiyada iyo ururrada ay u codaynayaan ama taageerayaan.

3. Xaddidaadaha Astaamaha:

Astaanta ururka ama xisbiga waa in ay noqoto mid gaar ah oo muujinaysa aqoonsiga ururka/xisbiga (unique identifier). Waxaana ka reebban in ay ka muuqdaan:

- i. Calaamad dowladeed (astaamaha Qaranka, ama calaamadaha la xiriira hay'adaha Dawladda) si aan loo marin habaabin codbiyayaasha.
- ii. Calaamado qabyaaladeed si aan loo abuurin kala qeybsanaan iyo eex siyaasadeed oo salka ku haysa qabyaalad.
- iii. Calaamado la xiriira dariiqo diimeed si looga hor-tago kala saaridda diinta iyo isticmaalka firqad diimeed si loogu kasbado taageerada Dadweynaha.
- iv. Astaamaha urur kale si looga fogaado isku dhex-yaac iyo khaladaad la xiriira aqoonsiga ururrada/xisbiyada.



4. Xuquuqda Murashaxiinta iyo Isticmaalka Astaamaha Doorashada:

Murashaxiinta uu Guddiga Madax Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha shaaciyoo, si waafaqsan faqradda 5aad ee Qodobka 43aad ee Xeerka Doorashooyinka, waxa ay xaq u leeyihiin in la ilaaliyo xuquuqdooda murashaxnimo (candidate rights).

5. Tani waxay xaqiijinaysaa in:

- i. Murashax kastaa uu si xor ah ugu tartami karo doorashada, isaga oo aan la kulmayn cadaadis sharci-darro ah.
- ii. Astaanta ururka/xisbiga waa in si sax ah loogu muujiyo warqadda codbixinta (ballot paper) si codbixiyeyaashu ay si fudud u garan karaan xisbigooda/ururkooda doorashada.
- iii. Guddiga Madax Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa in uu dammaanad qaado ilaalinta xuquuqda murashaxiinta si waafaqsan xeerarka dalka, iyadoo la dhowrayo nidaamka doorashooyinka iyo hab-raacyada sharciyeed ee doorashooyinka lagu maamulayo.

Qodobkan waxa uu xoojinayaa xasiloonida doorashooyinka, caddaaladda tartanka, iyo ilaalinta aqoonsiga xisbiyada iyo ururrada siyaasadeed, si loo sugo in doorashadu ay noqoto mid hufan oo waafaqsan xeerarka Dalka u yaalla.



QAYBTA 6AAD:

Qodobka 21aad: Shuruudaha u Tartamidda Doorashooyinka Dowladaha hoose

1. Duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa magaalada, iyo xubnaha goleyaasha deegaanka ee degmooyinka Dalka waxaa u tartami kara qofkii buuxiya shuruudaha soo socda: a. In uu yahay muwaaddin JFS;
 - b. In uu yahay codbixiye ka diiwaangashan degmada uu ka tartamayo;
 - c. In taariikhda doorashada ay u buuxdo da'da 25 sano jir;
 - d. In uu ku soo galo tartanka magaca Urur/xisbi siyaasadeed.
 - e. In aanu ku dhicin xukun maxkamad awood u lihi kaga joojisay qabashada xil dowladeed. ama looga qaaday xuquuqdiisa tartanka iyo codeynta doorashooyinka dambi culus awgiis;
 - f. In aanu hayn xil dowladeed oo kale; iyo
 - g. In uu bixiyo khidmada tartanka.
2. Qofkii loo doorto jagooyinka ku xusan Faqradda 1aad ee Qodobkan waxaa ka reebban muddada uu hayo xilka loo doortay:
 - a. Qabashada xil dowladeed oo kale ee aan sharcigu u oggolaan;
 - b. In uu hantidiisa ka iibiyo dowladda ama ka ijaaro;
 - c. In uu iibsado ama kireysto hanti dowladeed.

Qodobka 37aad: Shuruudaha Doorashada Madaxweynaha JFS

1. Murashaxa xilka Madaxweynenimo ee Jamhuuriyadda Federaalku waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya.
2. Murashax kasta ee u tartamaya xilka Madaxweynaha Dawladda Federaalka waa in saddexdii sano ee u dambaysay murashaxnimadiisa ka hor aysan Maxkamadi ku ridin xukun culus oo ciqaab ah oo kama-dambays ah oo aan ka yarayn shan(5) sano.
3. Murashax kasta oo u tartamaya xilka Madaxweynaha waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada uu xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka dalka.
4. Murashax kastaa waa in uu bixiyo khidmadda tartanka.

Qodobka 38aad: Shuruudaha Doorashada Hoggaamiyaha iyo ku-xigeenka ee Dowlad Goboleedka/SSC-Khaatumo

1. Murashixiinta jagada Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeen ee Dowlad- Goboleedyada iyo SSC-Khaatumo waa in ay buuxiyaan shuruudaha Dastuurka Dowlad- Goboleedka oo aan ka hor-imaanayn Dasuurka JFS.
2. Murashax kasta ee u tartamaya xilka Hoggaamiye iyo Ku-xigeenka Dowlad Goboleed/SSCKhaatumo waa in saddexdii sano ee u dambaysay murashaxnimadiisa ka hor aanay Maxkamadi ku ridin xukun culus oo ciqaab ah oo kama-dambays ah oo aan ka yarayn shan(5)sano.
3. Murashax kasta oo u tartamaya xilka Hoggaamiyaha iyo ku-xigeenka ee Dowlad Goboleedka/ SSC-Khaatumo waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada uu xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka Dalka.
4. Murashax kastaa waa in uu bixiyo khidmadda tartanka.

Qodobka 39aad: Shuruudaha Murashaxiinta labada Gole ee BJFS

1. Murashaxiinta u tartamaya xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Federaalku waa in ay buuxiyaaan shuruudaha Dastuurka oo tilmaamaya qofka kamid noqonaya xubnaha Baarlamaanka federaalka una dhigan sidan:
 - a. In uu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo codbixiye ahaan u diiwaangashan;
 - b. Xiskiisku dhan yahay;
 - c. D a 'diisuna ka yarayn 25 jir ;
 - d. Waa in uu kamid yahay codbixiyeyaasha ku jira Diiwaanka codbixiyaha;
 - e. Leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta;
 - f. Waa in uu i ska casilaa xilkasta oo dowduwan, shaqaalaha dowladda, diplomaasiyiinta, guddiyada madaxa-bannaan i y o h a y ' a d-baanhnaan iymo axudbnaahxaabahda garsoorka lix (6) bilood ka hor gudbinta murashaxnimadiisa.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimmayn shuruudaha ku xusan Faqradda (1) ee qodobkan,



murashaxa u tartamaya doorashooyinka Baarlamaanka waa in aan shantii sano ee u danbeeyay aanu ku dhicin xukun ciqaab oo kama-dambbeys ah.

3. Qof kasta oo Murashax Baarlamaan ahi waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka Dalka.
4. Musharixiinta u tartamaya xubinnimada labada Gole ee BJSF waa in ay bixiyaan khidmadda tartanka.

Qodobka 40aad: Shuruudaha Murashixiinta Goleyaasha Wakiillada Dowlad- Goboleedka/SSC-Khaatumo iyo Golaha Caasimadda Muqdisho

1. Murashixiinta u tartamaya xubnaha goleyaasha wakiillada ee dowlad-goboleedyada, SSC-Khaatumo waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan Dastuurka dowlad- goboleedka/SSCKhaatumo ee aan ka hor-imaanayn Dastuurka JFS.
2. Qof kasta oo murashax u ah Gole Wakiillo Dowlad Goboleed/SSC-Khaatumo, ama Golaha Caasimadda Muqdisho waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka Dalka.
3. Musharixiinta u tartamaya xubinnimada goleyaasha wakiillada dowlad- goboleedkasta/SSC-Khaatumo iyo Golaha Caasimadda Muqdisho waa in ay bixiyaan khidmadda doorashada.


Qodobka 41aad: Khidmadaha Murashaxnimada Doorashada

Murashax kasta ee u tartamaya xilalka hoos ku cad waa inuu bixiyaa khidmadda ku hor qoran oo aan celin lahayn taasi oo lagu shubayo khasnadda midaysan ee Dowladda Federaalka:

- a. Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Konton kun (USD50,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- b. Xilka Hoggaamiyaha dowlad-goboleedka/ SSC-Khaatumo Soddon kun (USD 30,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- c. Xilka Hoggaamiye ku-xigeenka dowlad-goboleedka/SSC-Khaatumo Shan iyo toban kun (USD 15,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- d. Xilka Duqa Caasimadda Muqdisho Soddon kun (USD 30,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;



- e. Xilka ku-xigeenka Duqa Caasimadda Shan iyo toban kun (USD 15,000) oo Muqdisho Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- f. Duqa degmada iyo ku-xigeenka Laba boqol iyo konton (USD 250) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- g. Xilka xubinnimada Barlamaanka Federaalka toban kun (USD 10,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- h. Xilka xubinnimada Golaha Wakiilada dowlad-goboleed/ SSC-Khaatumo kun (USD 1,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- i. Xilka xubinnimada Golaha Caasimadda kun (USD 1,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;
- j. Xilka xubinnimada goleyaasha deegaanka Boqol (USD 100) oo Doollarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma;





QAYBTA 6AAD: HUBINTA XEERKA DOORASHOYINKA URUR/XISBIGA
GUDIHIISA

No	Shuruudaha Xeerka doorashooyinka hor-dhaca ah (primary elections)	
1	Dhismaha guddi doorasho oo madax-banaan lehna: - a. Habka xubinimada b. Qaab-dhismeed c. Shaqooyin d. Muddo xileed	
2	Shuruudaha musharixiinta doorashooyinka hordhaca ah (primary elections)	
3	Ma waafaq-sanyihiin shuruudaha Cutubka 6aad ee Xeerka Doorashooyinka Qaranka	
4	Baaxadda iyo ujeedooyinka Xeerka oo ay kamid tahay: a. Doorashooyinka lagu maamulayo (goleyaasha) b. Nooca doorasho c. Xafiisyada uu dhisayo (madax-weyne, hogaamiye) d. Waxyaabaha uu reebayo	
5	Habraac saami-qaysiga beelaha, deegaanka iyo jinsiga (Gender Balance)	
6	Habraaca rafcaan qaadashada go'aanada guddiga doorashada ee urur/xisbiga	
7	Khidmadda Diiwaan-gelinta musharaxa	
8	Qodobbo muujinaya xoriyadda, sinaanta iyo caddaaladda maamulka doorashada	
9	Wax-kabalka xeerka	

Foomka Diiwaan-gelinta Murshaxiinta

1. Xogta Murshaxa

Madaxa Xogta	Faahfaahinta Xogta
Magaca oo Afaran	
Magaca hooyada oo Afaran	
Jinsiga	<input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhedig
Taariikhda Dhalashada	
Goobta Dhalashada	
Tirsiga Kaarka Cod-bixinta	
Degmada	
Xiriirka (email/telefoon lambar)	
Xogta deegaanka (address)	
Ururka soo Sharraxay:	

2. Lifaayada:

- Sawirka Kaarka Cod-bixinta.
- Warqadda Aqbalaadda Murashaxnimo
- Warqadda Anshaxa oo Saxiixan
- Caddeynta is casilaadda (hadii uu ahaa shaqaale dowlada, diblomaasi, ciidan.....)
- Caddeynta bixinta Khidmadda Murashaxnimo
- Warqadda Caddeynta danbi la'aanta(CID-da)
- Warqadda taageerada Urur Siyaasadeedka